

# ★★ EVERY ★★ KID IN A PARK



**Marin lacag la'aan ah oo lagu tago  
Dhulalka iyo Biyeyaasha Dowladda  
Federaalka looguna talagalay  
darajada fasal 4aad ee dugsiya iyo  
Martidooda**

Somali

**Adduunyo  
waxbarasho,  
cirbixin, iyo  
madadaalo ayaa  
sugaysa cunug  
kasta!**



Waxaan u baaqaynaa dhammaan carruurta dhigata fasallada 4aad!

Maxaad ka taqaan arrimaha ku saabsan Dhulalka iyo Biyeyaasha federaalka ee Maraykanka? Waxaad

ka heli kartaa inta badan meel kasta! Ka bilow Puerto Rico ilaa Maine iyo Virginia ilaa Pacific Islands, qaar ka mid ah Maraykanka meelaha ugu cajaa'ibka badan ayaa ku sugaya inaad cirbixiso.

Wax ka baro hiddahaaga oo ku xiran dabaciiga adiga oo sahaminaya in ka badan 400 oo xadiiqado qarameed ah iyo malaayiin ekar oo dhulal iyo biyeyaal federaal ah. Booqo meelaha yara qaboobaha ah sida Land Between the Lakes (Dhulka u Dhexeeya Haraha), Channel Islands, St. Louis Arch, San Antonio Missions, guriga Frederick Douglass, Canyon of the Ancients, iyo Florida Keys. Dhageyso yey ciyaysa, booqo raadadka dhaynosoorka taariikhaha-hore, ul dooni ku dul sabbee webi, u raadraac meeshay mareen Lewis iyo Clark, ama eeg samada habeen gudcur ah, oo laac xiddigaha!

Booqo [www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov) si aad uga ogaato in ka sii badan waxa ku saabsan sida loo helo iyo loo isticmaalo warqadda aad ku-dhaafayso, iyo si aad ugu hesho caawimo qorshaynta socdaalkaaga, iyo si aad u hesho waxyaabaha waxbarashada la heli karo, iyo si aad u hesho telefoon lambarrada iyo cinwaannada.

[www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov)

**Arday kasta oo fasallada 4aad ee Maraykanka dhigata ayaa la mariqaadayaa.**

Adiga oo ka qayb gala barnaamijka *Cunug Kasta Oo Xadiiq Jooga (Every Kid in a Park)*, ayaaad booqan kartaa oo aad wax ka baran ka bartaa hadda dhulalkaaga iyo biyeyaashaada federaaliga ah. Daar xiise gaar ah oo aad u yeelato taariikhda iyo dhaqanka oo huri ballanqaad cimiriga oo idil lagu badbaadinayo meelaha wax ku oolka ah. Aqqon u yeelo fursadaha looga helayo waxqabadyada fasalka ama siyaabaha looga qeybqaadanayo sidii loo badbaadin lahaa meelahan cajaa'ibka leh.

Laga bilaabo Sebtembar 1, 2015, haddii aad tahay arday dhigta fasallada 4aad (oo ay ku jiraan kuwa guriga wax lagu baro iyo waxbartayaasha dooribka-xorta leh ee 10 sano jira) waxaad soo dejisan kartaa foojar adigu aad iska leedahay oo aan xaddid lahayn, oo si xor ah marin ugu hesho dhulalka biyeyaasha federaalka ilaa sannad!

**Dhaqaaq oo hel ku-dhaafkaaga!**

Helitaanka ku-dhaafka ayaa fudud! Booqo qaybta "Get Your Pass" (Ku-dhaafkaaga Hel) ee [www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov), dhammaystir ciyaarta onlaynka ah, oo soo dejiiso foojarka qofka gaar looga dhigay oo u isticmaal ku gelidda goobaha dhulalka iyo biyeyaasha federaalka. Foojarkan warqadda ah ayaa lagu beddelan karaa mid ka sii waaritaan badan, oo ku-dhaaf Hay'ado ka Dhaxayn Sannadeedka loogu talagalay Ardayda fasallada 4aad ah goobaaha qaarkood ee ah dhulalka biyeyaasha federaalka. Booqo <https://store.usgs.gov/pass/PassIssuanceList.pdf> si aad aad u hesho liiska dhamaystiran ee goobaha soo saara waraaqahaas meesha lagu dhaafayo.

Fadlan ula xiriir si toos ah goobta dhulalka biyeyaasha federaal ah haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan aqbalka ku-dhaafka iyo khidmadda:

- Bureau of Land Management (Waaxda Maaraynta Dhulka)([www.blm.gov](http://www.blm.gov))
- Bureau of Reclamation (Waaxda Dib-usoo-Noolaynta)([www.usbr.gov](http://www.usbr.gov))
- U.S. Fish and Wildlife Service (Adeegga Kalluunka iyo Duur-joogta Maryakanka) ([www.fws.gov](http://www.fws.gov))
- National Oceanic and Atmospheric Administration (Maamulka Bad-waynta iyo Hawo dhuleedka Qaranka)([www.oceanservice.noaa.gov](http://www.oceanservice.noaa.gov))
- National Park Service (Adeegga Xadiiqada Qaranka ([www.nps.gov](http://www.nps.gov)))
- U.S. Army Corps of Engineers (Injineerada Ciidamada Hawlaha-Gaarka ah)([www.corpslakes.us](http://www.corpslakes.us))
- U.S. Forest Service (Adeegga Kaynta Maraykanka)([www.fs.fed.us](http://www.fs.fed.us))



## Ayaa ka mid ah foorjarka ama ku-dhaafka?

Markay tahay arday ka mid ah fasallada 4aad oo wata foorjar ama ku-dhaaf, qof kasta oo gaariga adiga kugula kulajira ayaa la idiinku oggolaan lacag la'aan goobaha ugu dallaca khidmadaha gaadiid ahaan. Haddii aad booqanayso goob ugu dallacada qof ahaan, ilaa saddex qaangaare ah ayaa loogu oggolaan doonaa lacag la'aan ardyaga fasalka 4aad ee wata ku-dhaafka. Haddii u ardayga fasalka 4aad iyo qoyskiisa ama qoyskeedu ay fuushan yihiin baaskiillo, ilaa saddex qaangaare la socda ayaa la raacinayaa, iyagana! Ardayga fasallada 4aad wuu inuu la socdaa si loo isticmaalo ku-dhaafka.

Tacliimeyayaasha ayaa waliba ka qaybgeli kara! Maantaba onalyn tag oo booqo [www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov)si aad wata dheeraad aad ogaato.



Adeegga Xadiiqada Qaranka • Adeegga Kaymaha

Injineerada Ciidamada Hawlaha-Gaarka ah • Waaxda Maaraynta Dhulka

Adeegga Kalluunka iyo Duur-joogta Maryakanka • Waaxda Dib-usoo-Noolaynta

Maamulka Bad-waynta iyo Hawo dhuleedka Qaranka



## Ku gal meesha khidmad la'aan!

Goobaha dhulalka iyo biyeyaasha federaalka qaarkood ee aan shaqaaluhu joogin, ku-dhaaf sharciyaysan ayaa loogu baahanyahay inay ka muuqato gaadiidka dhexdiisa. Ku-dhaafka Hay'ado Ka Dhaxayn Sannadeedka loogu talagalay Ardayda fasallada 4aad ayaa ah in lagu muujiyo muraayaada dambe iyada oo la isticmaalo waxa ka laalaadin ama meesha darwalka ka soo horjeeda. Haddii adiga oo ah, ardyaga fasalka 4aad, aad haysato foorjar warqad ah, foorjarka waa in loo dhigo si loo arki karo baar=koodhka.

Aaladaha qorshaynta socdaalka ayaa laga heli karaa goobahan internet:

- [www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov)
- [www.findyourpark.com](http://www.findyourpark.com)
- [www.discovertheforest.org](http://www.discovertheforest.org)
- [www.recreation.gov](http://www.recreation.gov)

## Ogow wax dheeraad ah oo ku saabsan Every Kid In a Park

Barta internetka ee Every Kid in a Park ayaa bixisaa macluumaad ku saabsan sida si ay u helaan foorjar iyo ku-dhaaf, iyo talooyin qorsheysad socdaal, iyo sida arrimaha loo qaybgeli karo. Fadlan booqo [www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov) ama nagala soco EveryKidinaPark dusha Facebook, Instagram, Twitter, iyo YouTube wixii faahfaahin dheeraad ah.

Ka ogow dheeraad [www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov) oo nagala soco:



## Su'aalaha Had iyo Jeer La Iswayddiyo

**S. Sidee ayay ardayda fasallada 4aad ee Maraykanka (oo ay ku jiraan kuwa guriga wax lagu baro iyo waxbartayaasha dooribka-xorta leh ee 10 sano jira) ay ku heli karaan foorjarka ama ku-dhaafka?**

J. Adiga oo booqda [www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov), ciyaara ciyaarta onlaynka ah, oo soo dejista foorjarka qofka gaar looga dhigay.

**S. Maxaa foorjarka ama waraaqda ku-dhaafka ah loo oggolyahay?**

J. Waraaqda ku-dhaafka meesha ayaa LACAG LA'AAN oo waxay dabbaraysaa galitaanka iyo urooyinka adeegga caadiga ah ee dhammaan dhulalka iyo biyeyaasha federaalka, ilaa sannad buuxa laga bilaabo Sebtembar 1 iyada oo joogsanaysa Ogast 31 sannadka fasalka 4aad ee ilmahaaga. Ma dabbarayso urooyinka adeegga fidsan ee ah sida kaam dibad seexadka, dooni kaxaysiga, dhigashada gaadiidka, booqashooyinka gaarka ah, urooyinka turjumaadda, fasaxyada gaarka ah, ama dooyo ku qaadka. Waliba, qaar ka mid ah ganacsiyada qandaraaslaha gaarka loo leeyahay ee maareeya goobaha qaarkood ee ku yaal dhulalka iyo biyeyaasha federaalka ayaa laga dhici karta inayna oggolaan waraaqda ku dhaafka. Fadlan weyddiiso meesha aad booqan doonto wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan aqalka ku-dhaafka.

**S. Miyuu hal foorjar ama ku-dhaaf u oggolaan doonaa meesha galitaankeeda ka badan hal gaadiid?**

J. Maya. Kaliya gaadiidka qofka leh waraaqda ku-dhaafka ayaa lacag la'aan ku soo gali doona.

**S: Waraaq ku-dhaaf laha ee saaran baaskiil miyuu la dhexgali kara goobaha dhulalka ama biyeyaasha federaalka asxaabta baaskiillada wata?**

J. Haa. Waraaq ku-dhaaf laha iyo ilaa saddex qaangaar oo la wadata baaskiil ayaa baaq ku soo gali kara.

**S. Miyaa la ii soo celin karaa foorjar ama ku-dhaaf lumay ama la xaday? Miyaa la raadraaci karaa lambarro taxaneedka?**

J. Maya. Arrimaha xog asturnaanta iyo tixgelinta suurtagalnimada awgood, waraaq ku-dhaafyada qofka looma soo celin karo haddii ay lunto ama la xado; foorjar ama waraaq ku-dhaaf cusub ayaa marin looga heli karaa iyada oo la tago barta internetka ee [www.everykidinapark.gov](http://www.everykidinapark.gov) iyo iyada oo la dhamaystiro waxqabadyadii la midka ahaa si loo helo foorjar cusub oo waraaq ah.

**S. Haddii aan iloobo inaan u soo qaato goob foorjarkayga ama ku-dhaafkagayga oo aan bixiyo khidmadda lagu soo galo ama isticmaalka, ma soo diri karaa risiidka iyo fotokoobiga ku-dhaafka ama foorjarka si lacagta dib la iigi soo celiyo?**

J. Lacag u soo celin lama bixiyo. Fotokoobiga ku-dhaafka ama foorjarka, humaagyada elektiroonigga ah, iyo laalalinta ayna u wehelin ku-dhaafyo ayaan oggolaan u lahayn isticmaalka soogelitaanka.

**Q. Miyuu qof aan saaxiibbo nahay iga ergisan karaa foorjar waraaq ah ama Ku-dhaafka fasalka 4aad ee Hay'ado Ka Dhaxayn Sannadeedka?**

J. Maya. Adiga, oo ah qofka iska leh ku-dhaafka (ardayga fasalka 4aad), waa inaad joogtaa meesha ku dhaafka la isticmaalayo. Qof kale ku wareejin ma leh.